

## ILAALIN CUSUB OO MUHIIM AH OO LOOGU TALAGALAY IJAARTAYAASHA

Sharci-dejinta Oregon ayaa ansixisay ilaalin cusub oo loogu talagalay ijaartayaasha ka tirsan HB 2001 (2023). Sida ay dhigayaan sharciyada cusub, ijaartayaashu waxay leeyihiin xuquuq muhiim ah oo gacan ka geysan karta in ay ka caawiso iska saarida guriga ee sababteedu tahay bixin la'aanta lacagta ijaarka, kharashka, ama lacagta kale oo uu ku leeyahay mulkiile guri. Xuquuqdani cusub waa ka mid ah:

- Ogeysiinta iska joojinta ijaarka ee loogu talagalay ogeysiinta bixin la'aanta lacagta ijaarku waa in ay siisaa **ugu yaraan 10 maalmood** ijaartayaasha in ay ku bixiyaan ijaarka lala soo daahay iyo in ay joogaan gurigooda.
- Haddii ijaartayaashu awoodaan in ay bixiyaan ijaarkooda soo daahay dib marka kiiska maxkamaddu bilaabmay, laakiin ka hor kiiska maxkamadda, iska saarida guriga waa in meesha laga saaraa.
- Haddii mulkiilayaashu gurigu ka horjoogsadaan ijaartayaasha in ay sinaba u bixiyaan lacagta ijaarkooda, oo ay ku jiraan in la diido in lala shaqeeyo bixiyaha taageerada dhanka ijaarka, ijaartayaashu waxay yeeshaan difaaca iska saarida guriga ee la xiriirta bixin la'aanta lacagta ijaarka.

### **Ogeysiinta iska joojinta ijaarka ee loogu talagalay bixin la'aanta lacagta ijaarka waa in ay bixisaa ugu yaraan 10 maalmood si loo bixiyo**

Sida uu dhigayo sharciga cusub, ijaartayaasha bil-bil wax u ijaarta ama leh heshiis ijaareed waxay xaq u leeyihiin ugu yaraan ogeysiin 10 maalmood ah ka hor inta uu mulkiiluhu guriga uga saari karo bixin la'aanta lacagta ijaarka. Ogeysiinta 72 saacadood ah hadda ka dib looma oggola ijaarashada kasta oo aan ka ahayn ijaarashada toddobaad-toddobaadka ah. Haddii ijaarte si buuxda u bixiyo ijaarka lala soo daahay oo inta lagu jiro muddada ogeysiinta 10-maalmood ah, mulkiilaha gurigu ma gudbin karo iska saarida guriga oo ku saleysan ijaar aan la bixin. Haddii uu mulkiile guri siiyo ogeysiin 72 saacadood ah oo loogu talagalay bixin la'aanta lacagta ijaarka, ijaartayaasha waxa dhici karta in ay yeeshaan difaac sharci ee kiiska iska saarida guriga.

### **Ijaartayaashu waxay bixin karaan lacagta ijaarka lala soo daahay ka dib marka kiiska iska saarida gurigu bilaabmo**

Xataa haddii mulkiile guri uu horeba u bilaabay kiiska iska saarida guriga, ijaartayaashu hadda waxay leeyihiin xuquuq ay ku bixiyaan ijaarka lala soo daahay oo meesha looga saaro kiiska iska saarida guriga. Mulkiilayaashu guryuhu hadda ka dib xaq uma laha in ay diidaan bixinta lacagta ijaarka iyada oo sababtu tahay waqtiga la bixinayo ee lagu tilmaamay ogeysiinta bixin la'aanta lacagta ijaarka oo waqtigiisii la soo dhaafay. Ijaartayaashu waxay haystaan ilaa waqtigiisa maxkamadda si ay u siiyaan mulkiilahooda guriga lacagta ijaarka ee waqtigii la bixin lahaa la joogo ee ku qoran iska joojinta ijaarka.

## **Mulkiilayaasha gurigu ma diidi karaan in ay la shaqeeyaan bixiyayaasha taageerada dhanka ijaarka**

Haddii mulkiilaha gurigu diido in uu la shaqeeyo bixiya taageerada dhanka ijaarka, iyada oo ka dhalatay ijaartaha oo aan bixin karin lacagta ijaarta, ijaartayaashu waxay yeeshaan difaaca iska saarida guriga oo ku saleysan bixin la'aanta lacagta ijaarka. Haddii mulkiile guri ka horjoogsado ijaarte in uu siyaabo kale u bixiyo lacagta ijaarka, ijaartayaashu waxaa dhici karta in ay yeeshaan difaac.

## **Caawimaad Dhanka Sharciga ahaa La helayaa!**

Haddii maxkamadda iska saarida guriga lagu geeyo iyada oo sababtu tahay bixin la'aanta lacagta ijaarka, oo aad u maleynayso in mulkiilahaaga gurigu uusan raacayn sharciga, waa in aad isla markiiba la xiriirtaa kartaa Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga. Waxaad Mashruuca Iska difaacida Iska saarida Guriga ka waci kartaa 888-585-9638 una dhaaf farriin Isniinta-Jimcaha laga bilaabo 9-1 galabnimo. Ama waxaad foomka internet-ka ka buuxin kartaa <https://oregonlawcenter.org/eviction-defense-project/> waqti kasta.

Haddii aad jeclaan lahayd in aad qareen kala hadasho xuquuqda aad leedahay, waxaad macluumaadka lagala xiriirayo ka heli kartaa xafiiska gargaarka sharciga oo kuu dhow oo ku yaala <https://oregonlawhelp.org/find-legal-help>.